



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Sibtambar 8, 2022

Ku socota: Dhammaan ka qayb qaatayaasha ODDS, hawl wadaagayaasha iyo shaqaalaha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka Ujeedada: Wacyigelinta monkeypox

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa [dhawaan ku dhawaaqay dillaaca cudurka hMPXV](#), oo sida caadiga ah loo yaqaan monkeypox. Tani waa walaac, maxaa yeelay qof kasta ayaa qaadi kara monkeypox. Halkan waxaa ku qoran ilaha qaarkood si lagu caawiyo.

Ilo dheeraad ah

Sida laga soo xigtay [Xarumaha La Dagaalanka iyo Ka Hortagga Cudurka \(CDC\)](#):

- Monkeypox waa cudur keeni kara astaamaha hargabka oo kale iyo finan.
- Isku gudbinta dadka ee fayraska monkeypox wuxuu dhacaa marka si toos ah loo taabto boogaha 'lesions' ama dheecaannada jirka oo cudur qaba, ama kaa soo gaaro dheecaannada neefsashada muddada si fool-ka-fool ah waqti dheer la iskugu dhow yahay.
- Qofka waxaa loo arkaa in uu yahay mid faafin kara ilaa laga helyo bogsasho buuxda oo finanka ah oo leh sameysanka lakabka maqaarka jirka oo cusub.

[Website-ka monkeypox ee \(CDC\)](#) ayaa leh tiro ilo ah oo ku qoran Ingiriisi iyo [Spanish](#) oo ay ku jiraan [tilmaamo loogu talagalay xarumaha noloshu ee la isku urursan yahay halkaasi oo monkeypox uu ka jiro](#).

Ilaha Oregon

Si aad ula socoto macluumaadka cusub ee ku saabsan monkeypox ka jira Oregon, [booqo website-ka monkeypox ee OHA](#). OHA waxay bixisaa:

- Ilaha Ingiriisiga iyo Isbaanishka.
- Tilmaamaha daaweynta.

- Baaritaanka iyo macluumaadka tallaalka.
- Tirada kiisaska hadda ee Oregon.
- Macluumaadka cusub ee OHA.
- Macluumaad loogu talagalay hawl wadaagayaasha oo ay ku jiraan Qabiilka iyo caafimaadka dadweynaha ee degaanka.

Su'aalaha iyo haddii aad dareemayso jirro.

Haddii aad dareemayso jirro oo aragto [finan iyo astaamo cusub](#), iska ilaali taabashada maqaar ilaa maqaar kale, la hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama wac 211.

Fadlan su'aalaha ku saabsan monkeypox ku hagaaji daryeel bixiyahaaga caafimaadka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.